

Waa maxay Cyclogest®?

Cyclogest® waa dawo siilka la geliyo oo ay ku jirto progesteron - hormoon jinsi dumar ah oo dabiiici ah oo inta badan ku sameysma ugxan -sidaha dhexdeed. Cyclogest® waxaa loogu talagalay dumarka u baahan progesterone dheeraad ah inta lagu daaweynayo barnaamijka dhalmo caawiye ah (ART). Ka dib markii Cyclogest® la geliyo siilka, progesteron ayaa lagu sii daayaa gudaha, waxaana qaadaa dahaarka ilmo -galeenka waxayna kordhisaa fursadahaaga inaad uur yeelato oo aad xajisato uurkaaga marka lagaa daweeyo madhalaysnimo aan ikhtiyaar ahayn.

Sideed u isticmaashaa Cyclogest®?

Had iyo jeer qaado Cyclogest® sida uu dhakhtarkaaga ama kalkalisadaadu kuu sheegtay.

1

Ka saar baakadda Cyclogest®

Si fican u maydh gacmahaaga ka dibna baakada ka saar Cyclogest® dawada siilka (vagitorium).

2

Gelinta Cyclogest®

Si aad Cyclogest® u geliso siilkaaga, ku qabo dawada siilka dhexdiisa faruuryaha dheddooda oo kor iyo gadaal u geli. Way sahlanaan kartaa in la salaaxo ama la jiifsado.

3

Dawadu ha shaqayso

Kadib marka Cyclogest® siilka la geliyo, si tartiib ah ayuu u dhalaalaa kulaylka jirka awgiis oo progesteron ayaa si tartiib tartiib ah uu sii daayaa, ka dibna waxaa qaata dahaarka makaanka. Markay taasi dhacdo, waxaad la kulmi kartaa dheecaan, laakiin tani gabi ahaanba waa caadi marka daawooyin lagu siiyo siilka. Xor ayaad u tahay inaad isticmaasho ilaalinta nigiska (trosskydd) si aad u ilaaliso nigiskaaga.





Sidee loo kaydiyaa Cyclogest®?

Ku kaydi dawada Cyclogest® ugu badnaan 30°C.

Haddii aad ilowdo qaadashada Cyclogest®

Dhakhtarkaaga ama kalkalisadaada ayaa ku siiyay tilmaamo ku saabsan sida loo qaato Cyclogest®. Qiyaasta lagu taliyey waa laba jeer maalintii - subaxda iyo ka hor wakhtiga jiifka. Haddii aad ilowdo inaad qaadato Cyclogest® - qaado qiyaasta sida ugu dhakhsaha badan ee aad xasuuusato oo u sii wad sidii hore. Ha qaadan qiyaas laba -laab ah si aad u kaabto qiyaasta la illaaway.

**Si taxaddar leh u akhri buug
-yarahaa ka hor intaadan bilaabin
qaadashada Cyclogest®**

Cyclogest (progesteron), 400 mg, dawada siilka (vagitorium). Cyclogest waxaa loogu talagalay dumarka u baahan progesteron dheeraad ah inta lagu daaweynayo barnaamijka dhalmo caawiye ah (ART). Progesteron wuxuu ku dhaqmaa dhaarka ilma -galeenka wuxuna kaa caawinayaa inaad uur yeelato oo aad xajisato uurkaaga marka lagaa daaweynayo madhalaysnimo (madhalaysnimo aan ikhtiyaari ahayn). **Digniinta iyo Taxadarka:** Si taxaddar leh u qaado oo isla markiiba u sheeg dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadahan muddada daaweynta ama dhowr maalmood ka dib marka ugu dambeeyey; xanuu ku dhaca weylaha ama xabadka, neefta oo si kedis ah u qabate ama qufac dhig leh, madax -xanuuu ama matag aad u duran, dawkaahad, daal ama isbeddel ku yimaadda arragga ama hadalka, dacifinimo ama kabuubyo gacanta ama lugta, calaamadaha murugada oo sii xumaaday. Cyclogest waxay sababi kartaa dawkha, sidaa darteed darawalada iyo dadka isticmaala mashiinada waa inay taxadaraan. **Si taxaddar leh u akhri buug -yarahaa ka hor intaadan bilaabin qaadashada Cyclogest.** Waxaa ku jira macluumaad adiga muhiim kuu ah. Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah ama aad leedahay waxyeeliooin, weydii dhakhtarkaaga, farmashiistaha ama kalkaalisada.

Xiriirka: Gedeon Richter Nordics, Barnhusgatan 22, 111 23 Stockholm. Tilifoon: 08-611 24 00. Macluumaadka caafimaadka: limayl: medinfo.se@gedeonrichter.eu. Tilifoon: 08-560 394 76.

Macluumaad la soo gaabiyeey oo ku saleysan buug-yarahaa xirmada ee ku taariikheysan 2020-04-03.

Wixii macluumaad dheeraad ah eeg www.fass.se.



GEDEON RICHTER

Barnhusgatan 22, 111 23 Stockholm, Sweden.